



## Bamble Kommune

Ku:Ardayda iyo waalidiinta dugsiyada hoose/dhexe ee Bamble.

Waxaa isbedel lagu sameeyay sharciga waxbarashada xeerkiisa 9a.

Si loo helo waxbarasho hufan oo dhammaan ardayda dalka ay u simanyihiin iyadoo laga ilaalinayo

Wax kasta oo keeni kara cunsuriyeyn iyo ciriirin dhib ku ah hufnaanta waxbarashada. Sidaa awgeed ayuu baarlamaanka iyo dowlada dalka Norway waxay xeeriyeen in isbedel lagu sameeyo sharciga waxbarashada xeerkiisa ama faqradiisa 9a.

Bamble Kommune isagoo taa tixraacaya ayey go'aansadeen in aanan arday lagu dhibaateyn Karin lana cirririn Karin, ayna mamnuuc tahay in naf ahaan iyo shaqsiyad ahaanba aan loo dhibaateyn Karin arday.

Bamble commune wuxuu xooga saaraya in xeerkaasi uu dhaqan galo ayna tahay mas'uuliyad saran iskool waliba iyo shaqaalaha ka shaqeeyo.

Haddi uu tacadi dhaco maxaa talaabo ah oo aad qaadeysaa:

1. Wargeli qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha iskoolka, kaasoo ay waajib ku tahay inuu gaarsiiyo maamulka iskoolka. Maamulka iskoolka waa xil saran oo waajib ah inuu arinkaasi si xaqiiqa ah u baaraan.
2. Maamulka iskoolka waxaa laga raba warbixin qoraal ah oo ku saabsan dhacdada iyada ah iyo sidii loo daaweyn lahaa. Waana in loo xilsaaraa qof mas'uul ah oo arinkaasi daba galo si aysan mar kale u dhicin, waxaan ka marneyn marnaba in ardayda ay ku leeyihiin dowlad muhiim ah iyadoo la tixgeliyo xuquuqda ardayda.
3. Haddi ay dhacdo inuu iskoolka uu dhibaatadaasi meermeeriyo ama ka gaabiyo waxaa laga raba qofka weyn ee arinkaasi keenay inuu dacwad degdeg ah u gudbiyo maamulka gobolka am FYLKESMANNEN-ka. Iyadoo uu ku cadaadinayo isaguna maamulka iskoolka inuu arinkaasi degdeg wax uga qabto.
4. Haddii uu maamulka gobolka amarkiisa uu ka socon waayo waxaa dacwadaasi aad u gudbineysaa wasaaradda waxbarashada ee dalka waxaana arinkaasi kaa caawinayo xafiiska waxbarashada degmada ee kommunaha Bamble (Skolekontoret i Bamble).

Warbixin dheeri ah waxaad ka heleysaa:

[www.udir.no/laring-og-trivsel/skolemiljo/meld-mobbing](http://www.udir.no/laring-og-trivsel/skolemiljo/meld-mobbing), Haddi aad dhibaato ku qabto iskoolka halkaasi waxaad ka heleysaa cid ku hagta.

Dhamman ardayda, waalidiinta iyo macalimminta waxaa si wada jir ah waajib ku ah iney ka hortagaan wax kasta oo wiiqi kara hannanka waxbarsho.

Med vennlig hilsen

Trond Gausnes

Kommunalsjef (Gudd. Waxbarashada Degaanka Bamble )

Enhet for skole og barnehage.